



Qoysaska PPS waxay Xaruunta Dharka ee PTA caruurtooda oga heli karaan dhar bilaash

Maadaama heerkulku hoos usii dhacaayo lana galaayo waqtiga qaboobaha, waxaa kor u kaca baahida loo qabo dharka qaboowga laga gashto. Dugsiyada Dadwaynaha ee Portland, qoysaska qaba baahiyaha dharka iyo waxyaabaha kale ee daruuriga ah waxa ay baahiyaha ay qabaan ka raadsan karaan barnaamijka muddada soo jiray.

Xaruunta Dharka ee PTA waxay qoysaska PPS caawinaysay ilaa sanadkii 1964. Guud ahaan barnaamijka waxa uu u hawlgalaa si bilaash ah waxa uuna u shaqeeyaa in badan 1,500 arday sanad kasta. Haddii aad taqaano arday ka tirsan PPS oo qaba baahiyaha dharka da'dooda ku habboon, fadlan qoyskooda usoo tilmaam xaruunta.

- **Goobta ay kutaalo:** Lambarka qolka waa C-56 waxa uuna ku yaalaa xaruunta Dugsiga Sare ee Marshall (3901 SE 91st Ave.)
- **Goorta la imaan karo:** Isniinta iyo Khamiista oo ah maalmaha dugsiga, laga bilaabo 10 a.m. illaa iyo 1 p.m., Septeembar ilaa iyo Abriil
- **Sida looga qaybqaato:** foom kasoo qaado dugsiga cunugaaga

Ardayda fasalada pk-12 ee katirsan PPS waxay , si bilaash ah kuheli karaan surwaalo, shaarar, funaanado, funaanadaha dhaxanta, kabootin, sigisaan, hoos gashi, jaakado, warqadaha suuliga iyo shay'yaasha loo isticmaalo nadaafada ayagoo cusub ama duug ah. Ardaydu waxay xaruunta soo booqan karaan labo jeer sanad kasta – hal mar kahor inta aan la gaarin xiliga qaboobaha, hal mar marka laga xabo.

Qoysaska ardayda dhigata fasalada K-8 ee jecel inay isticmaalaan adeega waxay foomka kasoo qaadan karaan xaafiiska dugsiga cunugooda ama lataliyaha (foomku waxa uu gacan kagaystaa xaqijintaa in ardaydu qayb kayhiin kana qaybgalaan PPS), iyo in waalidka iyo masuulka laga rabo inay u raacaan booqashadooda. Ardayda dugsiga sare kaligood ayaa waxa soo iibsan kara, laakiin waa inay foomka buuxiyaan.

Xaruunta Dharka waxay maalin kasta u shaqeen kartaa 60 qof, macaamiishana waxaa laga codsadaa inay layn kugalaan banaanka xaruunta kadibna hal hal ayaa loogu wacaa. Marka uu soogalo, arday kasta waxaa la siiyaa isku joog cusub oo hoos gashi ah, isku joog sigisaan ah, isku joog surwaal ah, isku joog kabo ah, jaakad iyo labo shaati. Isla marka uu ardaygu helo intaas, waxa ay u gudbi karaan qaybta dharka lasoo isticmaalay si ay waxyaabo kale oo badan usii qaataan. Waqtigaan adeeg sameesashada waxaa oggolaaday dugsiga.

Sidee caawimaad oga gaysan kartaa: Xaruunta Dharka waxa ay u baahan tahay dharka cusub iyo kuwa laasoo isticmaalayba, oo cabirkooda ka biloowdo 4T ilaa 4X, isla markii ayaad xiran kartaa umana baahna inaad dhaqdo. Dharka waxaad tabarucaad ahaan u keeni kartaa dugsi kasta oo ah PPS; fadlan kusoo rid bac aad kusoo qortay “Dharka Xaruunta PTA.” Xaruunta markasta waxay u baahan tahay sigisaanta iyo hoos gashiga cusub, waxa ayna mar dhow u baahan doonaan gacmo gashi, koofiyadaha iyo qalabka kale ee la xirto xiliyada qaboobaha.

“Waxaan si gaar ah hadda ugu baahanahay jaakadaha qaboowga laga xirto oo le’eg dhalinyarada,” waxaa dhahay Sharon Meigh-Chang, oo ah Agaasimaha Xaruunta Dharka ee PTA.

Xaruuntu waxa ay sidoo kale u baahah tahay dad si tabarucaad ah u shaqeeya laga bilaabo 9:30 a.m. illaa 1 p.m. Si aad wax badan oga ogaatid, fadlan la xariir Meigh-Chang at 503-293-0783 ama ptaclothingcenter@comcast.net.